# Ku socda mas'uulka: U wareegista fasalka 7-aad

## Fursadaha ardayga

- Ardeygu wuxuu u wareegi karaa dugsiga dhexe ee cinwaankiisa u dhow
- Ardeyga dugsiga hoose-dhexe ee wadajirka ah wax ka barta u bannaan inuu waxbarashada ka sii wato dugsiga uu imika ka dhigto
- Ardeyga wax ka barta fasallada lagu xoojjiyay ingiriiska ama labada luqadood ee uu bilaabay fasalkii 1-aad ama fasalkii 3-aad waxaa u bannaan inuu waxbarashadiisa ka sii wato fasal lagu xoojiyay maadada uu imika qaato isaga oo aanan laga qaadin imtixaan cusub oo doorasho
- Ardeygu wuxuu imtixaanka doorashada ku codsan karaa fasal lagu xoojiyay ingiriiska, labo luqadood lagu dhigto ama B2- latina lagu dhigto
- Ardeyga waxaa sidoo kale u bannaan inuu dalban karo dugsi kale oo Helsinki ku yaalla, dugsi gaar loo leeyahay ama dugsi ku yaalla degmo kale.

Ardeyga u baahan waxbarista baahida gaarka ah ee fasalka lagu qaato hore ayaa loo sii qorsheynayaa u wareegista uu dugsiga dhexe u wareegayo iyadoo si wada jir ah loogala shaqaynayo ardeyga, waalidka iyo qorsheeyaha gaarka ah ee nawaaxigaas.

## Ku ogaysii doorashooyinka fooma Wilma-da

**Buuxi muddada u dhaxeysa 20.11.-3.12. Wilma-da waxaa ku jira foom aad ku ogaysiin karto dugsiga uu ardeygu u wareegayo ama codsanayo marka uu fasalka 7-aad dhigto.** Sidoo kalena buuxi foomka, haddii uu ardeygu waxbarashada ka sii wadayo dugsiga wadajirka ah ee uu imika dhigto.

- Waxaad codsan kartaan **ugu badnaan shan boos.**
- Boosaska aad codsanayso u kala horraysii sida aad u kala danaynayso
- Waxaan u falanqaynaynaa boosaska kala duwan sida loo kala horraysiiyay, ardeygana waxaa laga dooran karaa oo kaliya hal boos oo ka mid ah kuwa la codsaday
- Codsashadu way ku xanibaysaa, taas oo ay macnaheedu tahay, haddii uu ardeygu booska helo, waxaad ku khasbantihiin inaad booska aqbashaan.
- Muddada lagu jiro wakhtiga codsiga waxaa wali bannaan inaad Wilma-da ku badbaddashaan boosaska aad codsateen, laakiin marka uu wakhtiga coodsigu dhammaado fursaddaas way idinka xidhmaysaa
- Muddada codsigu waa **20.11.-3.12.2023,** lamana qaabilayo codsiyada habsaamay

## Imtixaanka doorashada

Ardeyga codsanaya fasal lagu xoojiyay ingiriiska, labo luqadood lagu dhigto ama B2- latina lagu dhigto, waa inuu ka qaybqaataa imtixaanka doorashada oo uu ku baasaa. Imitixaanaadka doorashada waxaa la qabanqaabiyaa **10.1.-5.2.2024.** Macluumaadka faahfaahsan ee wakhtiga imtixaanka iyo goobta imtixaanka ku saabsan ka fiiri bogagga internetka ee dugsiyada. Imtixaanka doorashada si gaar ah laguguma baaqayo. Hal imtixaan ayaad ku codsan kartaan dhammaan dugsiyada isla waxbaristaas aad rabtaan jeediya, wuxuuna ardeygu imtixaanka ku diyaarin karaa dugsiga doorashooyinkiisa ugu horreeya.

Haddii codsadeyaashu ay ka badanyihiin boosaska waxbarasho, waxaa ardeyda lagu xulanayaa buundada imtixaanka doorashada ay ku keeneen sida ay ugu kala sarreeyaan. Haddii ardeygu uu xanuunsanayo maalinta imtixaanka doorashada, waxaa u bannaan inuu ka qaybqaato imtixaan la cusboonaysiiyay. Haddii ay sidaasi kugu dhacdo, soo ogaysii dugsiga intaanu imtixaanka doorashadu bilaabanin xanuunkaaga una keen caddeyn dhakhtar. Haddii ardeygu aanu ka qaybqaadan karin

imtixaanka doorashada ee la cusboonaysiiyay xattaa, isaga looma dooran karo dugsiga waxbaristaas la xoojjiyay lagu bixiyo.

Dugsiyada magaalada waxaa mudnaanta koowaad leh in loo qaato ardeyda reer Helsinki ah.

## Taariikhyada muhiimka ah

**1.–19.11.** Dugsiyada dhexe waxay qabanqaabiyaan munaasabado warbixineed. Ka fiiri wakhtiyada ay jiraan boggaga internetka ee dugsiyada.
**20.11.–3.12.** Buuxi foomka u wareegista fasalka 7-aad ee Wilma-da ku jira.

**10.1.–14.2.** Imtixaanada doorashada iyo wakhtiyada la cusboonaysiinayo. Ka fiiri wakhtiyadooda bogagga dugsiyada.
**22.3.** Go'aamada lagu sheegayo in ardeyda la qaatay waxaa guryaha loogu dirayaa boosto ahaan.

# Hubinta baahida taageerada waxbarashada ee marka fasalka 7-aad loo wareegayo

Baahida taageero ee ardeyga iyo saameynta ay leeyihiin waxqabadyada taageero ee la siiyay waxaa si joogto ah loo qiimeynayaa muddada lagu jiro sannad-dugsiyeedka. Go'aanka baahida taageerada gaarka ah waxaa la hubinayaa mar walba intaanan loo wareegin fasalka 7-aad, markaas oo go'aan laga qaadanayaa in taageerada baahida gaarka ah la sii wadayo iyo in la joojinayo. Haddii uu ardaygu u wareegayo dugsi kale marka uu fasalka 7-aad gaadho, dugsiga ardeyga diraya ayaa ka warhaynaya, in macluumaadka ardeygu u baahanyahay ee taageerada khuseeya loo wareejiyo dugsiga cusub.

## Macluumaad dheeraad ah:

- Macluumaadka khuseeya ardeyga u wareegaya fasalka 7-aad:https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/kouluun-ilmoittautuminen-ja-hakeminen/tietoa-7-luokalle-siirtyvalle
- Waxbarashada la xoojiyay, waxbarashada ingiriiska/labada luqadood iyo waxbarista qubeyska luqadda: https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/kouluun-ilmoittautuminen-ja-hakeminen/painotettu-opetus-ja-perusopetusta-eri-kielilla
- Bogagga internetka ee dugsiyadu leeyihiin: https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/peruskoulut
- Taageerada waxbarashada: https://www.hel.fi/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/tukea-oppimiseen-hyvinvointiin-ja-koulunkayntiin/oppimisen-tuki